

Ciida Carafada (Ciidul-Adxa) oo ka dhacday Xarunta Sharci-dejinta Alberta

Luulyo 07, 2022

Mudane Naysan M. Kuuber (Nathan M. Cooper), Afhayeenka Golaha Sharci-dejinta ee Alberta, wuxuu martigelin doonaa munaasabadda Ciida Carafada (Ciidul-Adxa) maalinta Talaadada, Luulyo 12, 2022, 3 da galabnimo. ee goobta Golaha Sharci-dejinta.

Jaaliyadaha Muslimiinta ee Alberta iyo adduunka oo dhan ayaa u dabaaldegaya Ciida Carafada (Ciidul-Adxa) marka qorraxdu dhacdo Julaay 13. Loona yaqaano Dabaaldegga Ciida Allabariga (Festival of Sacrifice), dhacdada waxay calaamad u tahay dhamaadka xajka, malaayiin xujaay oo Islaam aaminsan ayaa Mecca aadaya.

"Ciida Carafada (Ciidul-Adxa), ama Ciida Allabariga, waa maalin barakeysan oo Muslimiinta adduunka oo dhan iyo fursad ay ku wada tukadaan, cunnada ku qaybsadaan, hadiyado isku beddesha oo ay ugu adeegaan kuwa u baahan," ayuu yiri afhayeenka Kuuber (Cooper). "Sanadka oo dhan, jaaliyadaha Muslimiinta Alberta waxay muujinayaan naxariis aad u weyn oo loogu talagalay kuwa nasiibka yar ee ku nool gobolkayaga, Ciida Carafada (Ciidul-Adxa) waxay bixisaa casharro ku saabsan wax bixinta iyo isu hurida, waa qiyamka muhiimka u ah dhammaan dadka reer Alberta."

Waxaa hadalada jeedin doona:

- Muxammad Yaseen, ECA, Xildhibaan ka kasoo jeeda Waqiiyiga Kaalgari (Calgary-North), isagoo ku hadlaya magaca Gudoomiyaha Gobolka Alberta.
- Mudane Rod Loyola, oo ah xildhibaan ka kasoo jeeda Edmonton-Ellerslie, isagoo ku hadlaya magaca Hogaamiyaha Mucaaradka daacada u ah Boqoradda.
- Muhammad Iqbal Wattoo, Gudoomiyaha Golaha Jaaliyadaha Muslimiinta ee Edmonton
- Sadique Pathan, Imaamka Wacyigelinta, Masjidka Al Rashid
- Zahra Somani, Gudoomiyaha, Golaha Ismaaciiliyiinta ee Edmonton

Barnaamijka waxaa ku jiri doona akhrinta Qur'aanka Kariimka ah. Xafladdu waxay u furan tahay dadweynaha inay ka soo qaybgalaan si shaqsi ah waxaana sidoo kale si toos ah looga daawan doonaa Khadka tooska ee Golaha Sharci-dejinta ee Alberta kanaalada warbaahinta bulshada.

Weydiimaha warnaahinta

[Jeanette Dotimas](#)

780.862.6362

Golaha Sharci-dejinta ee Alberta

ALBERTA'S RECOVERY PLAN

Alberta's Recovery Plan is a plan to breathe new life into Alberta's economy and create new opportunities for every Albertan. It's a plan to build, to diversify, and to create jobs.